



Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Kastamada

Habraaca Dhamaystirka Foomka Cadaynta Badeecadda

Macluumaad Guud.

Habraacan waxaa lagu buuxinayaa macluumaadka badeecadda ganacsi. Waxaana buuxinaya mulkiilaha ganacsiga ama wakiilkiisa isaga oo ku qoraya macluumaadka lagama maarmaanka u ah buuxinta foomka cadaynta badeecadda.

Foomka cadaynta badeecadda waxaa loo qaabeeyay, hab sahlaya in ganacsadaha ama wakiilkiisu si sahlan u xaqiijiyaan/cadeeyaan badeecadda. Taas oo waafaqsan shuruucda iyo xeer-hoosaadyada u dagan Kastamada sida Xeer No. 73/2016.

Sida markii hore loo qaabaysanyahay Foomka Cadaynta Badeecadda (Goods Declaration Form: GDF) waxa ay ahaan jirtay in saraakiisha Kastamadu ka buuxin jireen ganacsatada macluumaadka badeecadda marka la qiimaynayo badeecadda si ay ugu soo bandhigaan Kastamka. Laakiin hadda Foomka Cadaynta Badeecadda, waxaa loogu talagalay in sida ugu macquulsan loo fududeeyo hirgalinta nidaamka cadaynta badeecadda ee uu ganacsadaha ama wakiilkiisu cadaynayaan noocyada badeecadda si loo yareeyo kharbudaada ganacsiga.

Isbadalka ugu muhiimsan ee la sameeyay, waxa weeyi in masuuliyadda dhamaystirka Foomka Cadaynta Badeecaddu (GDF) ay hadda ku dhacayso ganacsadaha, oo aanay haatan ku dhacdoonin Kastammada.

Masuuliyadda Ganacsadaha	
Xaqiijiyaha/Cadeeyaha badeecadda ama wakiilkiisu waa in ay buuxiyaan macluumaadkan soo socda eek u xusan Foomka Cadaynta Badeecadda.	
Barta/Goobta Kastamka	Gali Barta Kastam ee laga sameeyay Cadaynta/Xaqiijinta Badeecadda.
Taariikhda	Gali wakhtiga la cadeeyay badeecadda.
4. Warqadda Dalabka	Gali Lambarka warqadda dalabka (D.O-ga) ee aad ka heshay soo diraha badeecadda.
44. Liisanka W/Ganacsiga	Gali Lambarka Liisanka Wasaaradda Ganacsiga ee ganacsadaha badeecadda soo dhoofsaday.
Qofka ganacsiga la soo dagay	Gali magaca qofka ganacsiga la soo dagay oo dhamaystiran
9. Tirsiga Cashurta Ganacsiga (TIN)	Hadii ganacsadaha badeecadda la soo dagay uu leeyahay Tirsi u gaara Casuurta ganacsiyiisa (Tax Identification Number "TIN") gali lambarka edeggan/sanduuqan.
14. Cadeeyaha / wakiilka	Gali magaca wakiilka badeecadda oo dhamaystiran ee buuxinaya foomka cadaynta badeecadda
18. Gaadiidka	Gali macluumaadka nooca gaadiid ee loo adeegsaday badeecadda; tusaale; Duulimaad Lambarka/Diiwaanka Markabka i.w.m.
34. Asalka	Gali wadanka alaabada laga soo dhoofiyay.



Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Kastamada

40. BL/AWB	Gali inta Lambar ee gaadiidka sida ku cad dukumantiga (Qaansheegta Rarka/Qaansheegta xamaalka diyaaradda i.w.m).
Kastamadu waxa ay xaq u leeyihiin in ay ganacsadaha ka codsadaan in uu keeno qayb ama dhamaan dukumantiyadan soo socda ay ku soo lifaaqaan foomka Cadaynta. La xidhiidh xaruntaadii si aad u ogaysiiso dukumantiyada lagaaga baahanyahay.	
Qaansheegta saxda ah ee kama danbaysta ah. (qaan sheegta u qoraysa lama aqbalayo)	Qaansheegta waa in laga helaa macluumaadkan hoose: <ul style="list-style-type: none">• Magaca iyo ciwaanka iibiyaha oo dhamaystiran;• Magaca iyo ciwaanka soo iibsadaha oo dhamaystiran;• Lambarka qaansheegta iyo taariikhda la bixiyay;• Inta nooc ee badeecadda u raran, calaamadaha iyo Lambarada;• Culayska badeecadda cashuurta ka hor;• Nooyada badeecadda; xaddiga iyo liiska qiimayaasha badeecad kasta.
Qaansheegta Xamaalka badeecadda (la aqbali maayo ilaa qiimaha xamaalka badeecadda lagu cadeeyo foomka)	Qaansheegta xamaalka badeecadda ama cadaymaha kale ee muujinaya qiimaha xamaalka, hadii aanay ku cadayn qaansheegta kama danbaysta ah ee uu gudbiyay.
Liiska xidhmada badeecadda	Liiska muujinaya noocyada ay ka koobantahay xidhmada badeecadda ganacsigu.
Biilka dajinta (BL/AWB)	Dukumantiga la xidhiidha nooca gaadiid ee badeecadda lagu daabulay.
Liisanka Wasaaradda Ganacsiga	Liisanka Ganacsiga ee ay ganacsadaha siisay Wasaaradda Ganacsigu.
Cadeeyaha badeecaddu ama wakiilkiisu waa in uu saxo edega/sanduuqa khuseeya foomka cadaynta badeecadda ee xaqiijinaya dukumantiga lagu lifaaqay foomka. Cadeetaga badeecadda ama wakiilka cadaynta badeecaddu waa in uu foomka cadaynta badeecadda diiwaankeeda ugu dhamaystiraa shay-shay. Nooc kasta oo badeecada ahna waa in si gaara loo diiwan-galiyaa; iyadoo lagu muujinayo macluumaadka gaarka ah, qaybaha, xadiga qaybkasta, iyo xadiga guud ee badeecadda. Hadii loo baahdo, isticmaal warqadda dhamaystirka foomka cadaynta badeecadda si aad u dhamaystirto diiwaanka badeecadda. Qor inta warqadood ee aad ka isticmaashay edegga/sanduuqa foomka cadaynta badeecadda; tusaal eahaan; hadii aad isticmaashay sadex (3) warqadood, waa in loo calaamadiyo foomka 1/3, 2/3 iyo 3/3. Cadeeyaha ama wakiilka badeecaddu waa in uu sexeexo foomka cadaynta badeecadda (iyo warqad kasta oo daba socota), isagoo xaqiijinaya in ay runtahay tirada alaabada uu cadeeyay/xaqiiyay, ee uu ku soo bandhigay foomka (GDF), iyo macluumaadka kale ee tixraaca taageerada u ah Kastamka).	



Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Kastamada

Foomka Cadaynta Badeecadda oo la fududeeyay.

Hagahan/tilmaamahan soo socdaa waxa uu ku tusayaan sida ugu fudud ee loo buuxin karo foomka cadaynta badeecadda ee loogu talo galay badeecadaha aan loogu talogalin ganacsiga ee aanay ku waajibin cashuuro iyo badeecadaha ganacsi ee lagu qaado shamdadaha gacanta lagu qaato garoonada diyaaradaha ama eeriboodada (airports) ee loo yaqaano shamdadaha calaamadsan (tag bags).

Masuuliyadda Ganacsadaha Ganacsadaha ama wakiilkiisu waxa uu buuxinayaa xogta badeecadiisa ee ka banana Foomka Cadaynta Badeecadda.	
Barta Kastamka	Gali barta Kastam ee aad ka samaysay cadaynta.
Taariikhda	Gali taariikhda la cadeeyay badeecadda
4. Warqadda Dalabka	Gali warqadda dalabka (D.O) ee aad ka heshay/ uu kuu soo diray qofka badeecadda kuu soo raray.
44. Liisanka W/Ganacsiga iyo Dalxiiska	Gali Lambarka Liisanka Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska uu ka haysto ganacsadaha badeecadda la soo dagay.
Qofka ganacsiga la soo dagay	Gali magaca qofka ganacsiga la soo dagay oo dhamaystiran
9. Tixraaca Cashur bixinta Ganacsiga (TIN)	Hadii ganacsadahu leeyahay Tixraac Cashur-bixineed (TIN), gali edegga (sanduuqa) loogu talogalay (Badeecadaha aan loogu talogalin ganacsi).
14. Cadeeyaha/Xaqiijaha Badeecadda/Wakiilka.	Gali magaca wakiilka cadaynta badeecadda samaynaya ee matalaya ganacsadaha oo dhamaystiran.
18. Lambarka Duulimaadka	Gali lambarka duulimaadka badeecaddu la socotay.
34. Asalka	Gali wadanka alaabada laga soo dhoofiyay.
Kastamadu waxa ay xaq u leeyihiin in ay ganacsadaha ka codsadaan in uu keeno qayb ama dhamaan dukumantiyadan soo socda ay ku soo lifaaqaan foomka Cadaynta. La xidhiidh xaruntaadii si aad u ogaysiiso dukumantiyada lagaaga baahanyahay	
Warqadda Dalabka (D.O)	Shamdadaha calaamadsan 'tag bags' ee ay ku jiraan badeecado ganacsi.
Qaansheegta u danbaysa ee Saxda ah (La aqbali maayo qaansheegta baayacaada/ugu horaysa)	Qaansheegta waa in ay ku jiraan macluumaadkani; <ul style="list-style-type: none">• Magaca iyo ciwaanka iibiyaha badeecadda;• Magaca iyo ciwaanka iibsadaha/ganacsadaha;• Lambarka iyo taariikhda qaansheegtu soo baxday;• Inta nooc ee badeecadda u raran, calaamadaha iyo Lambarada;• Culayska badeecadda cashuurta ka hor;• Nooyada badeecadda; xaddiga iyo liiska qiimayaasha badeecad kasta.



Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Kastamada

	<ul style="list-style-type: none">• Noocyada Alaabada; xadiga iyo qiimayaasha alaabo kasta. <p>Waa badeecadaha aan ganacsi loogu talogalin ee ay ku waajibtay cashuurtu. Foomka cadaynta badeecadda ee sexeexan waa la aqbalayaa.</p>
Liisanka Wasaaradda Ganacsiga	Liisanka Ganacsiga ee ay ganacsadaha siisay Wasaaraadda Ganacsigu (Badeecadaha ganacsi uun loogu talo galay).
<p>Cadeeyaha badeecaddu ama wakiilkiisu waa in uu saxo edega/sanduuqa khuseeya foomka cadaynta badeecadda ee xaqiijinaya dukumantiga ku lifaaqan foomka cadaynta badeecadda.</p> <p>Cadeetaga badeecadda ama wakiilka cadaynta badeecaddu waa in uu foomka cadaynta badeecadda diiwaankeeda ugu dhamaystiraa shay-shay. Nooc kasta oo badeecada ahna waa in si gaara loo diiwan-galiyaa; iyadoo lagu muujinayo macluumaadka gaarka ah, qaybaha, xadiga qaybkasta, iyo xadiga guud ee badeecadda. Hadii loo baahdo, isticmaal warqadda dhamaystirka foomka cadaynta badeecadda si aad u dhamaystirto diiwaanka badeecadda. Qor inta warqadood ee aad ka isticmaashay edegga/sanduuqa foomka cadaynta badeecadda; tusaal eahaan; hadii aad isticmaashay sadex (3) warqadood, waa in loo calaamadiyo foomka 1/3, 2/3 iyo 3/3.</p> <p>Cadeeyaha ama wakiilka badeecaddu waa in uu sexeexo foomka cadaynta badeecadda (iyo warqad kasta oo daba socota), isagoo xaqiijinaya in ay runtahay tirada alaabada uu cadeeyay/xaqiiyay, ee uu ku soo bandhigay foomka (GDF), iyo macluumaadka kale ee tixraaca taageerada u ah Kastamka).</p>	